


Talada iyo Go'aanka u yeerista Culumada


Markii uu daba dheeraaday khilaaf ka dhexeeyay Xubnaha milkiilayaasha shirkadda SOMGULF ee aan xagga sare ku soo tilmaanay, dhowr goor oo horena gartooda loo galay balse wax xal ah loo waayay, ayaa waxa ay isla garteen guddigii arrintaa ku dhex jiray, Milkiilayaashii shirkadda SOMGULF & Guddiga Maamulka GMC Towers oo wada jira sida ku cad qoraaalka ku taariikhaysan 15 November 2014, in arrinta loo bandhigo Culumada, sidaa ayaana loogu soo gudbiyay Culumada codsigaa ku taariikhaysan 15/11/2014, ee ku lifaaqan Go'aankan Culumada. markaa ka dibna culumadu way aqbaleen codsigaas, sidaana waxa ay ku yimaadeen Imaaraadka 7/12/2014.

Kulumadii Culumada:

- Culumadu waxa ay kulamadoodii ugu horeeyay bilaabeen maalintii ay bishu ahayd 16 Safar 1436h, kuna beegnayd Isniin 8/12/2014. Waxaa kulmay Culumada aynu xagga sare ku soo tilmaanay iyo raggii guddiga ahaa ee hore ugu jiray arrinta gaar ahaan Shariif Cabdifataax Shariif iyo Cabdirisaaq jaamac, waxa ayna samaysteen Jadwalkii ay ku howlgali lahaayeen.
- Isla maalintaa waxay gudiga culimada qeybtii safarka ku timid booqdeen dhamaan mashaariicda SOMGULF waxayna u dul istaageen mid mid.
- Isla maalintaa saacaddu markii ay ahayd 8:30 habeennimo waxa ay culumadu bilaabeen kulammadoodii rasmiga ahaa, waxa ayna la fariisteen Xubnaha Shirkadda SOMGULF oo ay ka maqnayd markaas gabadha la yiraahdo Emelle (Zahra) Axmed Xaaji, oo iyadu ku soo biirtay fadhigii 10/12/2014 maqribnimadii.
- Maalinti ay bishu ahayd 17 Safar 1436h, kuna beeganayd 9/12/2014, 9:00 aroornimo waxaa bilowday kulankii labaad ee ay culumadu la yeelato xubnaha SOMGULF, kulankaas oo socday labadii gelin ee maalintaa oo dhan, kaas oo ay galinkii horana hadleen laba ka mid ah afarta ruux ee ka tirsanaa milkiilayaasha SOMGULF, gelinkii danbena ay hadleen labadii kale, kulankaas oo ay culumadu mid mid u dhegaysteen xubnaha, si ay u ogaadaan khilaafka dhexyaalla nooca uu yahay iyo cid walba argtideeda, su'aalo fara bandanna ay culumadu ku weydiineysay xubnahaas.
- Maalintii ay bishu ahayd 18 Safar 1436h kuna beegnayd 10/12/2014 waxa ay culumadu la kulmeen guddigii gacanta ku hayay maamulka guryaha Twin Towers'ka SOMGULF (GMC) ee cajmaan, kagana dalbadeen ra'yiga iyo argtida uga muuqata arrimaha taagan sida loo xallin karo ee ugu wanaagsan.
- Maalintii ay bishu ahayd 19 Safar 1436h kuna beegnayd 11/12/2014 waxa ay culumadu la kulmeen gabadhii ka maqnayd milkiilayaasha shirkadda SOMGULF Emelle (Zahra) Axmed Xaaji, oo iyadu ku soo daahday safar ay kaga timid Ingiriiska arrintan darteed, kana dhagesyteen dooddeeda iyo ra'yigeeda kaga aaddan arrinta ay culumadu ku jiraan xalkeeda.
- Waxaa kale oo guddiga culimadu sameeyeen kulamo gaar gaar ah oo ay la yeeshen qeybaha shirkadda SOMGULF, si ay culumadu u sameeyaan xog urursi, wixii uu qofku fagaaraha kala baqay oo xog ahna uga helaan.


12/12/2014


12/12/2014


12-12-2014